Boostada Dijital ah ee masuuliyiinta dawladda

Tag halkan borger.dk

Ka reebidda Boostada Dijital ah ee masuuliyiinta dawladda

Waxaad ka reebnaan kartaa in aad hesho Boostada Dijital ah ee ka timaadda masuuliyiinta dawladda haddii:

- aad qabto naafonimo kuu diiddan in aad waraaqaha ku hesho hab dijital ah
- aadan gurigaaga ku haysan kumbiyuutar leh khad internet oo ku filan
- aad qoran tahay in aad si joogto ah Denmark uga tagtay
- aad gurilaawe tahay
- aad qabto dhibaatooyin luqadda ah
- ay ficil ahaan kugu adag tahay in aad soo qaadato aqoonsiga NemID.

Si lagaaga reebo Boostada Dijital ah ee masuuliyiinta dawladda, waa in aad tagto xarunta adeegga muwaadiniinta.

Qof kale ayaad weliba weydiisan kartaa in uu ka reebidda magacaaga ku dalbado adigoo isticmaalaya awoodda qareenimo.

Waa maxay Boostada Dijital ah?

Boostada Dijital ah waa waraaqo ka yimaadda masuuliyiinta dawladda oo la mid ah waraaqaha aad iminkaba masuuliyiinta ka hesho. Waxay kuwaasi noqon karaan bayaannada lacagta hawlgabka, waraaqaha ka yimaadda isbitaalka ee ku saabsan baaritaannada ama farriimaha ku saabsan meesha laga helo xarunta daryeelka carruurta ee maalintii. Mustaqbalka waxaa la sii kordhin doonaa tirada waraaqahaas ee habka dijital ah laguugu soo diro halka boostada waraaqaha ee caadi ah.

Laga bilaabo 1 Noofembar 2014 dhammaan muwaadiniinta ka weyn 15 jir, ee ku diiwaansan lambarka diiwaangelinta shacabka ee Denmark (lambarka CPR), waxay waraaqaha Boostada Dijital ah ka heli doonaan masuuliyiinta dawladda.

Halkan **borger.dk** ama e-Boks.dk ku gal saxiixaaga dijital ah ee NemID si aad isu qorto. Waxaad halkan ka akhrisan kartaa waraaqaha kuugu jira Boostada Dijital ah waxaanad:

- ku qori kartaa cinwaanka emailka iyo lambarka telefoonka gacanta. Waxaad heli doontaa farriin marka waraaqo cusub aad ku hesho Boostada Dijital ah.
- waraaqaha Boostada Dijital ah ugu diri kartaa masuuliyiinta dawladda.
- si sugan ugu kaydsan kartaa dukumeentiyada iyo waraaqaha.

!

Sugan oo dabacsan

Boostada Dijital ah waa mid shakhsi ahaan loo leeyahay oo sugan, maxaa yeelay waxay ku xiran tahay saxiixaaga dijital ah ee NemID iyo lambarkaaga diiwaangelinta shacabka (lambarka CPR). Waraaqaha kuugu jira Boostada Dijital ah waxaad ka akhrisan kartaa kumbiyuutar kaste, xataa marka aad fasax dibadaha ugu maqan tahay.

Boostada Dijital ah iyo e-Boks

Waraaqaha Boostada Dijital ah ee kaaga yimaadda masuuliyiinta dawladda waxaad ka akhrisan kartaa www.borger.dk ama www.e-Boks.dk oo labadooduba ah bogag internet oo sugan. Waxaad u baahan tahay oo keliya in aad bogaggan internetka midkood ka fiiriso waraaqaha Boostada Dijital ah ee kaaga yimid masuuliyiinta dawladda. Ku gal aqoonsigaaga NemID.

Haddii aadan haysan aqoonsiga NemID, waxaad ka dalban kartaa halkan www.nemid.nu ama xaruntaada adeegga muwaadiniinta (borgerservice).

Haddii aad iminkaba isticmaasho e-Boks, waxaad u baahan tahay oo keliya in aad hubiso in aad isu diiwaangelisay si waraaqaha Boostada Dijital ah aad uga hesho masuuliyiinta dawladda. Waraaqaha Boostada Dijital ah waxaad si toos ah u heli doontaa laga bilaabo 1 Noofembar 2014.

Waxaad dooran kartaa nuskhadda af Ingiriisi ah ee Boostada Dijital ah ka dib marka aad gasho. Waxay sidaas tahay haddii aad waraaqahaaga Boostada Dijital ah ka akhrisato www.borger.dk ama www.e-boks.dk midka aad doorato.

!

Xusuuso in aad fiiriso Boostadaada Dijital ah

Xusuuso in aad Boostadaada Dijital ah si joogto ah uga fiiriso halkan **borger.dk** (afka Danish oo keliya) ama e-Boks.dk (afka Danish oo keliya/af Ingiriisi oo keliya). Sanduuqaaga farriimaha waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan farriimo muhiim ah oo leh taariikh kama dambays ah.

Ku qor cinwaanka emailka iyo/ama lambarka telefoonka gacanta, waxaana laguu soo diri doonaa email iyo/ama farriin qoraal ah marka aad waraaqo cusub hesho.

Dhammaan waraaqaha ka yimaadda masuuliyiinta dawladda laguma soo diri karo hab dijital ah. Sidaas darteed waxaad weli u baahan tahay in aad fiiriso waraaqaha kuugu yimaadda boostada caadi ah.

Dad kale u oggolow in ay eegaan Boostadaada Dijital ah

Hal ama dhowr qof ayaad u rukhsayn kartaa akhriska waraaqahaaga Boostadaada Dijital ah. Waxay kuwaasi noqon karaan qaraabadaada ama dad kaloo aad aaminayso.

Waxaad dadka kale akhriska u rukhsayn kartaa marka aad gasho halkan **borger.dk** ama e-Boks.dk. Xarunta adeegga muwaadiniinta ayaad weliba gargaar ka heli kartaa si aad taas u samayso.

Si aad dad kale akhriska ugu rukhsayso waa in aad:

- ogaato lambarka diiwaangelinta shacabka ee qofka gelitaanka loo rukhsaynayo
- doorato waraaqaha uu qofku akhrin karo
- qorto erey isgarad ah oo aad siiso qofka aad rabto in aad gelitaanka u oggolaato.

Qofka aad gelitaanka u oggolaatay marka uu rukhsaynta xaqiijiyo, waxuu waraaqahaaga Boostada Dijital ah ka eegi karaa gal gooni ah oo ugu jira sanduuqa farriimaha ee gaar u ah ee ku yaalla halkan **borger.dk** ama e-Boks.dk. Waxuu qofkaasi weliba heli karaa email marka aad hesho waraaqo cusub oo Boostada Dijital ah.

!

Adiga ayaa ka masuul ah waraaqaha laguu soo diro

Xusuusnow in aad weli masuul ka tahay in aad hubiso in la akhriyo waraaqahaaga Boostada Dijital ah.

Laga bilaabo 1 Noofembar 2014 waa in aad diyaar u ahaato Boostada Dijital ah

Laga bilaabo 1 Noofembar 2014 waraaqaha kaaga yimaadda masuuliyiinta dawladda waxaad ku heli doontaa nidaamka dijital ah sida waafaqsan Sharciga Boostada Dijital ah ee Dadweynaha ee Denmark.

Sidaas darteed waa in aad diyaar u ahaato in aad fiiriso Boostada Dijital ah adigoo iska qoraya halkan www.borger.dk ama www.e-boks.dk si aadan u seegin farriimaha muhiim ah ee kaaga yimaadda masuuliyiinta dawladda.

Haddii aadan fiirin karin Boostada Dijital ah, qof kale, matalan qaraabo, ayaad u oggolaan kartaa in uu kuu akhriyo waraaqaha kuugu jira Boostada Dijital ah.

Ka reebidda ayaad weliba ka dalban kartaa xarunta adeegga muwaadiniinta ee magaaladaada.

!

Gargaar ayaa diyaar ah

- Tag halkan www.borger.dk/digitalpost. Halkan waxaad ka akhrisan kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Boostada Dijital ah waxaanad ka heli kartaa hagista tartiib tartiib ah ee af Ingiriisi ku qoran ee ku saabsan sida la isugu diiwaangeliyo Boostada Dijital ah.
- Maktabadda xaafaddaada ayaa ku bari karta sida loo isticmaalo Boostada Dijital ah.
- Xarunta adeegga muwaadiniinta ayaa kuu tilmaami karta sida loo isticmaalo Boostada Dijital ah ama sida loo dalbado ka reebidda.

Bogagga internetka ee galkan ku jira waxay ku qoran yihiin af Danish, warbixinta qaarna waxaa lagu qoray af Ingiriisi.